



WAR SAXAAFADDEED

DATE: 23 JANUARY-2021

WADATASHIGA SARE EE WARBIXINTA QIIMEYNTA KHATARTA QARANKA SOOMAALIYA.

Kulan Wadatashi sare ee warbixinta Qiimeynta Khatarta Qaranka (NRA), waxaa lagu qabanayaa Hotel Decale, Muqdisho Janaayo 23, 2021. Wadatashiga, waxaa si wada jir ah u soo qaban qaabiyay Xafiiska Wasiirka 1aad ee Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Xarunta Warbixinta Maaliyadeed (FRC), wuxuu ahaa mid muhiim u ah saldhigga iskaashiga hay'adaha dowladda Soomaaliya in ay aqoonsadaan khataraha qaranka iyo u nuglaanta halista saameynta ay ku leeyihiin dhaqaalaha dalka Soomaaliya.

Wadatashigaas, waxaa ka soo qeyb galay Wasiirka 1aad ee Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya M.ne Maxamed Xuseen Rooble iyo xubno ka tirsan golihisa wasiirrada, hay'adaha maaliyadda, ganacsatada gaarka, golaha dhaqaalaha qaranka, iyo hay'adaha caalamiga ah. Arrintaani, waxay tilmaanta koobaad ka tahay ajandayaasha ugu muhiimsan ee dowladda ee hagaajinta jawiga ganacsiga, soo jiidashada ugu qiimaha badan ee dowladda oo kobcinta bay'adda ganacsi ee gudaha iyo maalgashiga dibedda muhiimadna siineysa yagleelka isku xirka qiimeyn dhex marta hay'adaha maaliyadda iyo bangiyada caalamiga.

Warbixinta Qiimeynta Khatarta Qaranka (NRA) ee lacagta dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada waa warqad dib u eegid oo muhiim u ah awooda Dowladda Federaalka Soomaaliya la dagaa-lankeeda dambiyada maaliyadeed, waxayna ka mid tahay dhameystirka deyn cafinta (ECF). NRA, waxay sidoo kale u diyaarinaysaa Soomaaliya qiimeynta Is-dhexgal urur goboleedka Bariga Dhexe iyo Waqooyiga Afrika (MENA-FATF) ee sanadka 2024.

Ujeeddada kulanka wadatashiga waa in la garto lana qiimeeyo si loo yareeyo khataraha AML/CTF, iyada oo loo marayo siyaasad is-waafajisa in dib loo qiimeeyo qaab-dhismeedka sharci iyo xeerarka dalka si awood loogu siiyo Soomaaliya, iyadoo loo marayo hagaajinta siyaasadda iyo dib u qiimeenta qaab-dhismeedka sharci iyo nidaamyada dalka si loogu suurto geliyo hay'adaha maaliyadeed ee Soomaaliya in ay noqdaan kuwo lagu kalsoonan karo nidaamkooda. Natiijooyinka warbixinta NRA, waxaa loo soo saaray in ay hor u-mariyaan xeeladaha qaran

soona saaraan qorshe hawleedka sharciga AML/CFT, si la mid ah qoorshaha afarta sano ee soo socota oo gacan ka geysan doonta qoondoynta ilaha AML/CFT, iyo dib-u-eegista hor-u-marinta la xisaabtanka hay'adaha.

Xarunta Warbixinta Maaliyadeed ee Soomaaliya (FRC), waxaa hadafkeedu yahay in ay sare u qaado kalsoonida hay'adaha maaliyadeed ee caalamka iyo bangiyada xiriirka ganacsi la leh dalka Soomaaliya iyo xawaaladaha (MTBs) iyadoo la sameynayo nidaam lagu ogaanayo laguna carqaladeynayo lacagaha la dhaqay iyo maalgelinta argagixisada, iyadoo la hor-u-marinayo hab lagu ogaanayo oo lagu carqaladeyn karo lacag dhaqidda iyo maalgelinta argagixisada dalka Soomaaliya. Xaruntu, iyadoo u adeegsanayso unuga sirtoonka maaliyadda (FIU), heshaa, falan-qeysaa, faafisaa xogaha.

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, waxay ku howlan tahay dib-u-habeynta si loo dhaqan geliyo nidaam wax ku ool ah ee AML / CFT. Balse, waxaa jira rabitaan siyaasadeed oo xoog leh iyo caalami oo isku haleyn karo laguna fulinayo talaabooyinka looga baahan yahay sharciga AML / CFT iyo xeerarka FATF.

###